Kabka Guud iyo Daryeelka Kabitaanka
General Cast and Splint Care - Somali

waxbarashada bukaanka

DIS002-SO

Kabka ama kabiddu waxay sii saa addinka taageero kadib jabista ama qaliinka. Waxay sidoo kale u isticmaali karaan inay ku kala saaraan muruqyada addinka. Kabitaanka ama kabaygu waxa uu ku ilaaliyaa gacanta ama lugtameel ku haboon oo waxa uu kahortagaa ama uu yareeyaa dhaqdhaqaaqa

Daryeel Kabitaan

Kabitaanka ama kabidda waxa lagu sameeyay balastar ama fiberglass-ka. Waxay qariyeen addinka (gacan ama lug), oo waxay dabooleen meel weyn. Waxay isticmaaleen inay dhaqdhaqaaqa u diideen qayb kamid ah addinka. Labadoodaba balastarka iyo fiberglass-ka waxa lagu adkaynayaa saddex ilaa shan daqiiqo, laakiin balasterku gabi ahaanba kuma qalalo ama adkaado 24 ilaa 72 saacadood. Inta lagu guddo jiro muddada waxa laga yaabay in balastarku uu jabo ama diismo, sidaa darteed isticmaal taxaddar dheeraad ah. Ka ilaalinta kabista dhaawac, wasakhda iyo qoyaan waxa laga yaabaa inay adagtahay in la sameeyo, gaar ahaan carruurta aadka u yar yar. Laakiin waa muhiin in la ilaaliyo in kabku uu noqdo naddiif iyo qalayl intii suurtogal ah.

Ilaali qalaylka kabka.

Ka ilaalinta kabka qoyaanku way adagtahay maxaayeelay qubaysigu waa qayb kamida ah jadwal maalmeedka, oo ma saadaalin karno isbeddelka cimilada. Haddii kabku uu ka samaysanyahay balaster, wii jilci doonaa marka uuqoyo oo ma sii wadi doono taageero habboon ina lagu gudo jiro bogsashada. Kabka Fiberglass-ku ma jilco marka uu qoyo; Si kastaba ha ahaatee, qalajinta xagga hoose ee kabku waxay ku reebi kartaa qoyaan, noqonaya mid ur xun, oo waxay ku sababi kartaa maqaarka cadanyasho. Waxa habboon inaad qaadato qubayiga isbuunyada intii aad ku qubaysan lahayd tuumbada ama aad toos u qubaysato. Haddii kabku uu qoyo la xidhiidh Rugta Bukaan socodka.

Ilaali nadaafadda kabka

Waa CAADI in lagu sawiro ama laga qoro kabka dushiisa qalinka aan go'in ama calaamadeeye.

Ka fogow bogoska ciida ama garoomada lagu ciyaaro.

Inay gasho ciid ama quruurux hoosta kabka waxay ku sababi kartaa maqaarka burbur iyo cun-cun

Macluumaadkan waxaa loogu talogalay ujeedooyin waxbarasho kaliya. Looguma talogalin is loogu badalo talada daryeel caafimaad bixiyahaaga .Haddii aad hayso wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama kooxaha kale ee daryeelka caafimaadkaaga
If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Kabka Guud iyo Daryeelka Kabitaanka
General Cast and Splint Care - Somali

Hubi kabka si joogto ah wixii ur aan caadi ahayn.

Daryeelka Maqaarka

U hubi maalinle si aad u hubiso in kabku uu aad u giijisanyahay ama uu aad u dhuuqsanyahay. Kabka haddii laga dhigo mid giijisan wuxuu xaddidayaa qaybinta dhiigga ee immanaysa addinka ama wuxuu dhaawici karaa neerfaha.

Waxaad dhawrtaa faraha iyo suulasha.

- Koolasha iyo faraha kabka waa inay ahaadaan casaan khafiif ah oo la dareemaa diirimaad taabashada Si aad u tijaabiso in wareegga dhiiggu sax yahay caddaadi cidida farta ama cidida suulka. Cididu waa inay isku beddeshaa casaan khafiif ah hal ama laba daqiiqo gudohood kadib marka caddiska laga siidaayo. Waa inaanay jirin kabuubyo, jidhiidhico ama xanuun.
- Waa inaad awoodaa inaad dhaqaajiso faraha iyo suulasha. (Isbarbardhig daqaaqa hadda iyo dhaqaaqii hore ee aad samayn jirtay markii kabka lagugu sameeyay.)
- Ha u isticmaalin shayna inaad ku xoqdo hoosta kabka Xoqitaanku waxa uu sababi karaa inuu dhawacmo maqaarku oo uu sababo caabuq. Sidoo kale waxay u leexisa in hoosta wax laga galiyo taas oo ka dhigta in ay nabar yeelato.
- Ilaali inaad ka soo saarto kabka shayada shisheeyo sida cammuudda, lacagta birta ah, qalimaanta, alaabta yar yar, ama cuntada.
- Haku riixin shayna hoosta cidhifyada kabka si ay u gasho. Haddii xoqitaano dhinacyada xanafta lehi ay jiraan, waa inay “petaled” si looga hortago in maqaarku cun-cuno.
- Dhig tuwaal ama barkin yar xaga hoose ee canqawga si looga ilaaliyo cadaadis kuyimaad cidhibta marka aad dhabarka u jiifto.
- Bararka kabku waa wax caadi ah, gaar ahaan qaliinka kadib. Si loo yareeyo raaxo la’aanta oo la yareeyo bararka intalagu gudo jiro daaweynta, kor u qaad gacantaada ama lugtaada sida badanaa kuu suurto gal ah oo ku qabo baraf (ku jira shay biyaha celinaya) xaga sare ee kabka ama xaga kale ee addinka ee u dhaw.
- Haddii bararku aanu yaraan, ogeysii dakhtarkaaga ama kalkaalisada si dhakhso ah.

Goorma iyo maxaad ku wargelisay dhakhtarkaaga

Dhibaatooyinka kabka, gaar ahaan kuwa saamaynaya dhaqdhaqaaqa, dareenka, iyo/ama wareejinta

Macluumaadkan waxaa loogu talogalay ujeedooyin waxbarasho kaliya. Looguma talogalin is loogu badalo talada daryeel caafimaad bixiyahaaga .Haddii aad hayso wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama kooxaha kale ee daryeelka caafimaadkaaga
If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

addinka, waa khatar inay ku keenan daawac abadi ah addinka waqti muddo kooban. Raadso gargaar deg deg ah haddii midkamida xaaladaha soo socdaa ay jiraan hadda.

- Wasakh cusub oo ku dhalatay kabka oo ka soo baxaysa kabka
- Ur xun oo kasta oo ka immanasa kabka (urta dhididka kabku waa caadi)
- Cun cun xad dhaaf ah sabab aan lagaranayn
- Isbeddello ku yimid midabka ama heer kulka suulasha ama faraha
- Korodhka bararka, jidhidhicada, xanuun ama dareenyaraan ku timaad faraha iyo suulasha taas oo aanad
- ku nafisin kor u qaadida adinka
- Cun cunka maqaarka ama finan ka soo baxa
- Suulasha kuwaas oo u muuqda inay dib ugu siibteen kabka
- Kabka dareema inuu aad u giijisanyahay ama aad u dabacsanyahay (dhaqaajinta kabka kor iyo hoos)
- Jabinta kabka taas oo u ogolaanaysa dhaqdhaqaaq
- Xanuun kaas oo sii socda oo aanay xalin karin daawooyinka la qoray
- Awood daro in la dhaqaajiyo faraha iyo suulasha, ama isbeddelaan qadar far ama suul la dhaqaajiyo
- Xoqitaan xanuun leh ama gubasho hoosta kabka
- Kabku wuu qoyaa.
- Xumad aan la qeexikarin oo ah 101.5° ama ka badan
- Shayada shisheeye ee soogala gudaha kabka

Su'aalo?

La xidhiidh Telefoonka caafimaad ee kalkaalisada.

Wicid **651-229-3890** Isniinaha–Jimcayaasha, 7 g.h.–9 g.d.; Sabtiyada, 8 g.h.–6 g.d.; iyo Axadaha iyo Fasaxyada, 8 g.h.–4 g.d.

Wicid **800-719-4040** (telefoon bilaasha h) dhammaan waqtiyada kale — ama waqti kasta oo aad ka baxdo Twin Cities

Macluumaadkan waxaa loogu talogalay ujeedooyin waxbarasho kaliya. Looguma talogalin is loogu badalo talada daryeel caafimaad bixiyahaaga .Haddii aad hayso wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama kooxaha kale ee daryeelka caafimaadkaaga
If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.